You can ask for this leaflet in large print, on audio tape or in another language. Please contact us on 020 8709 4300.

আপনি এই লিফলেটটি বড় ছাপায়, অডিও টেপে বা অন্য যে কোন ভাষায় পেতে পারেন। দয়া করে আমাদের সাথে যোগাযোগ করুন ০২০ ৮৭০৯ ৪৩০০ নম্বরে। [Bengali]

Waxaad dalban kartaa warqaddan oo ku daabacan farta waawayn, iyadoo ku duuban cod ama ku tarjuman luqadaha beesha. fadlan nagala soo xidhiidh telefoonka ah 020 8709 4300. [Somali]

Możesz poprosić o tę ulotkę drukowaną dużą czcionką, w postaci zapisu audio lub w innym z języków społeczności. Skontaktuj się z nami pod numerem telefonu 020 8709 4300. [Polish]

Quý vị có thể xin tờ rơi (tờ thông tin) này bằng khổ chữ lớn, băng ghi âm hoặc tiếng nói khác trong cộng đồng. Xin vui lòng liên lạc với chúng tôi, điện thoại số 020 8709 4300. [Vietnamese]

你可要求這份單張的大字印刷本、錄音或其他社區語言的版本，請致電 020 8709 4300 與我們聯絡。[Chinese]

آپ یہ کتابچہ بڑے حروف، آڈیو یا کسی دوسری کمیونٹی زبان میں طلب کر سکتے ہیں۔ براہ مہربانی ہم سے فون نمبر 020 8709 4300 پر رابطہ کریں۔ [Urdu]

Awarded for excellence

INVESTOR IN PEOPLE

North River Alliance

Gateway Housing Association
409-413 Mile End Road, London, E3 4PB
Residents: 020 8709 4300
General enquiries: 020 8909 4409
Fax: 020 8709 4400
Email: enquiries@gatewayhousing.org.uk
www.gatewayhousing.org.uk

Waraaqdani waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan adeegyada aanu ku siin doono. Waraaqdani ma saamayn doonto xuquuqahaaga lagu sharxay heshiiskaaga deganaanshaha. **Aad ayay u mahadsanyihiin dhammaan dadka deggan ee gacanta ka geystey soo saaritaanka waraaqdan.**

17

Kirada lagugu leeyahay

Miyey dhibaatooyin kaa haystaan bixinta kiradaada?

Rent arrears
Problems with paying your rent?
– Somali translation

gateway housing association

Waa maxay kirada lagugu leeyahay?

Haddii aanad kiradaadii bixinin, lacagta aanu kugu leenahay ayaanu ugu yeedhnaa 'kirada lagugu leeyahay'.

Maxaan sameeyaa haddii aan kiradayga bixin kari waayo?

Haddii aad kiradaada bixin kari weydo, fadlan sida ugu dhakhsaha badan noogu soo sheeg waxaanu ku dadaali doonaa inaanu ku caawino.

Waxa laga yaabaa inaanu awoodi karno inaanu kuu samayno qabanqaabooyin aad kirada lagugu leeyahay ku bixiso muddo ama waxaanu kuu gudbin doonaa hay'ad takhasus ku ah si ay kuu siiyaan talo lacag la'aan ah oo xagga lacagta ah, deynka ama dheefaha.

Waxa kale oo aanu leenahay shaqaale noo gaar ah oo dhibaatooyinkan kaa caawin kara.

Waanu fahamsanahay inay adkaan karto qirashada inaad kiradii iska bixin kari weydey. Haseyeeshee, waxa kuu fudud inaad deyn yar iska bixiso oo ka fudud inaad bixiso ta kugu ururtay sababtoo ah caawimo maad helin goor hore.

Maxaa dhaca haddii aan kiradayda bixin waayo?

Haddii aad nala soo xidhiidhi weydo, waanu kula soo xidhiidhi doonaa. Waxaanu kuula dhaqmi doonaa si cadaalad ah oo faham ku jiro. Waxaanu isku deyi doonaa inaanu kugu waafaqno sidaad isaga bixinayso kirada lagugu leeyahay laakiin, haddii aad nala soo xidhiidhi weydo oo akawnkaagana lacag lagu leeyahay, waxaanu qaadi doonaa tallaabo sharci ah taas oo keeni karta in guriga lagaa saaro.

Nala soo xidhiidh

Waanu fahamsanahay in mararka qaarkood ay dhibaatooyin kaa qabsan karaan inaad kiradaada bixiso. Haddii lacagaha aad bixinayso aad dib ula dhacdo, si toos ah noola soo xidhiidh adiga oo lasoo hadlaya telifoonka ah 020 8709 4300. haddii aad dhibaatada adigu isku koobto, deynku wuu sii kordhayaa waxaana laga yaabaa inaad gurigaaga lumiso.

Maxaa dhacaya haddii aan lacagaha kiradayda dib ula dhaco?

Waxaad anaga nala samayn kartaa qabanqaabooyin ah in lacagaha lagugu leeyahay aad toddobaadkiiba bixiso in yar oo dheeraad ah. Laakiin had iyo goor tallaabo sharci ah ayaanu ka qaadnaa dadka diida inay bixiyaan lacagaha lagu leeyahay.

Heshiisyada dib u bixinta

Labadeenu waxaynu samayn karnaa sida aad ku bixin karto lacagaha lagugu leeyahay. Kadibna waxaynu isku waafiqi karnaa in kirada aad toddobaadkiiba bixinayso aad ku darto waxoogeey dheeraad ah illaa iyo aad iska wada bixiso wixii lagugu lahaa oo dhan. Kuma weydiisan doono inaad bixiso waxaanu u aragno inaad awoodi karto in ka badan.

Talada Deynka

Waxaanu dhammaan dadkayaga deggan siinaa adeegga talobixinta ku saabsan deynta oo lacag la'aan ah, qarsoodi ah oo madaxbannaan. Haddii aad doonayso inaad qof kala hadasho dhibaatooyin xagga lacagta ah oo laga yaabo inay ku haystaan, fadlan na weydiiso adeeggan.

Tallaabo sharci ah

Haddii aad samayn weydo heshiis macquul ah oo aad ku wada bixinayso deynta lagugu leeyahay oo aad markaas heshiiskaas ilaalin weydo, tallaabo sharci ah ayaanu qaadi doonaa.

Heerka ugu horreeyaa wuxuu noqon doonaa in laguu soo diro 'Ogeysiiska la wareegitaanka guriga' (NOSP). Kani wuxuu ku siinaya illaa iyo afar toddobaad inaad ku bixiso deynta lagugu leeyahay. Afartaas toddobaad kadib waxaanu codsan doonaa dhegeysi maxkamadeed. Haddii aanu tan samayno, sida ugu dhakhsaha badan noola soo xidhiidh. Waxa laga yaabaa inaanu joojino tallaabada maxkamadda haddii aad ogolaato heshiis aad ku bixinayso lacagta.

Dhegeysiga maxkamadda

Haddii aanu kari kari weyno inaanu kugula heshiino qabanqaabo dhammaadka afarta toddobaad, waxaanu maxkamadda ka dalban doonaa amar la wareegitaan ah. Maxkamadu taariikh ayay u qaban doontaa dhegeysiga maxkamadda – laakiin weli ma aha mid dhammaatay inaad nala soo xidhiidho si dhibaatada loo xalliyo.

Haddii aad iskuba deyi weydo inaad bixiso ama aad jebiso heshiiska dib u bixinta, waxaanu maxkamadda ka codsan doonaa inay noo ogolaato inaanu sida ugu dhakhsaha badan guriga kaaga saaro. Haddii aad qaaday tallaabooyin aad ku bixinayso lacagta lagugu leeyahay, waxaanu sida caadiga ah maxkamadda ka codsanaa inay kugu amarto inaad bixiso lacagta lagugu leeyahay in go'an toddobaad walba. Waxa kale oo aad bixin doontaa kharashka maxkamadda. Waxa keliya oo aanu guriga kaa saari doonaa haddii aad jebiso amarkaas maxkamadda.

Halkan u jooga inay ku caawiyaan

Looma baahna runtii inay arrimuhu illaa iyo halkaas gaadhaan. Haddii aad nala soo xidhiidho isla marka aad la kulanto dhibaatooyinkan xagga lacagta ah, iyo haddii ilaaliso heshiiska dib u bixinta, waxaad ka baaqan doontaa dhibaatooyin mustaqbalka.

Xusuunow, waxaanu halkan u joognaa inaanu ku caawino. Nagala soo hadal telifoonka ah 020 8709 4300 oo weydiiso inaad la hadasho kooxda soo celinta dakhliga.